Sahanka Deganaha Guryaha dadweynaha ee 2020 (Public Housing Resident Survey 2020)

Su’aallaha badanaa la is weydiiyo

Sahanku muxuu ku saabsan yahay?

Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamiga (Department of Health and Human Services) waxay raadinaysaa aragtida iyo waxay ka aaminsan yihiin dadka ku nool guryaha dadweynaha Fiktooriya. Kan waxaa ku jiri doona su’aallo ku saabsan caafimaadkooda, dareenkooda amaanka iyo amniga, ku qanacsanaanta iyo adeegyada guryaha dadweynaha, dareenka bulshada iyo ka qaybqaadashada xarakaadka bulshada. Baaristu waxay kaloo sahaminaysaa khibradihii deganayaasha inta lagu jiray COVID-19.

Maxaad sahanka uga qaadaysaan dadka degan guryaha dadweynaha?

Sahanka Deganaha Guryaha dadweynaha ee 2020 (Public Housing Resident Survey 2020) Sahanka Deganaha Guryaha dadweynaha ee 2020 wuxuu u ogolaanayaa Wasaarada inay fahan fiican ka hellaan kiraystayaashu waxay rabaan, baahidooda iyo waaya-aragnimadooda. Waxaanu isticmaali doonaa macluumaadkaan hoose si loo qorsheeyo adeeg wanaasgan mustaqbilka laguna hawlgeliyo bulshada arrimo aad muhiim ugu ah.

Yaa samaynaya sahanka?

Wasaaradu waxay hawlgelisay McNair yellowSquares, shirkad sahamisa suuqa lehna khibrad hore xagga sahaminta dadweynaha iyaga oo magacayaga ku hadlaya.

Waxaad kaloo ka hubin kartaa websaytka www.mcnair.com.au.

Goobtee ka samaynaysaan sahanka?

McNair yellowSquares waxay sahamin doonaan deganayaasha dawlad goboleedka oo dhan, si kasta ha ahaatee tusaalaha ugu badan waxaa laga raadinayaa goobaha nawaaxiga Melbourne oo ay ka mid yihiin:

- South Melbourne (Park Towers)
- North Richmond
- Flemington
- North Melbourne.

Natiijooyinka afartaan goobood oo asalka ah waxay caawimi doonaan xarakaadka hawlgelinta bulshada goobta North Melbourne iyo Flemington wixii ka dambeeyey bandoogii COVID-19, fulinta juhdiga goobta ku salaysan oo ah South Melbourne iyo North Richmond.

Sahanku khasab miyaa?

Maya. Ka qaybgalka sahanku khasab maaha waase rabitaan.
Si kasta ha ahaatee, haddaan wax badan ka ogaano kiraystayaasha guryaha dadweynaha xaalka ku saabsan caafimaadkooda, baahiyaha bulshada iyo amaanka, Xukuumada Dawlad Goboleedku (State Government) waxay bixin kartaa kaalmooyin lagu wanaajinayo bulshadaada.

Waxaan ku noolahay mid ka mid ah afarta goobood horay ayaana u dhiibtay aragtidayda iyo waxaan u malaynayo wixii arrimahaan ku saabsan?

Wasaaradu waxay fahamsan tahay in ay ka jiraan xarakaadyo kale oo wax qabad North Richmond, South Melbourne, Flemington iyo North Melbourne oo ku lug leh dadka ku nool guryahaas iyo bulshada guud. Waxaanu dhiirigelinaynaa ka qaybgalkaaga joogtada ah iyo qiimaha waqtiga ay dadku ay siiyeen taas oo noo suurgelinaysa in aan ka bixino jawaabo jahaysan si looga warceliyo jawaabaha ay bixiyeen kiraystayaasha guryaha dadweynaha.

Wasaaradu hadda ka hor ilama tashan. Maxaad wax uga qaban weydeen dhibaatooyinka gurigayga?

Sahamada kuwan oo kale ah ayaa na siiya faham wanaagsan oo ku saabsan aragtiyaha kala duwan oo deganayaasha, oo naga caawimaya qorshe wax ka qabanaya mustaqbilka. Sahankaani ku weydiin mayo kamana jawaabayo codsiyo dayactir oo mucayina. Haddii aad qabto wax su'aalla ama dabeecad lid ku ah bulshada, fadlan la xiriir xafiiska gurisiinta ee agtaada ah ama Xarunta Wicida Gurisiinta *(Housing Call Centre)* · **wac 13 11 72.**

Ka qaybgalka sahanku ma mid qarsoon baa?

Haa. Dhamaan natiijooyinka waxaa isu geynaya McNair yellowSquares sidaas darteed shakhsiyaadka la sheegimayo. Waxaa laguu ta'kiidinayaa in aan la xusayn magacaaga sinaba marka natiijooyinka warbixinta la qadimayo ama ujeedooyinka daabacada ama ujeedooyinka qorshaha gudaha.

Caddaynta luqadeed ee Qayaxani (Plain Language Statement) waxay bixisa tafaasiil ku saabsan Sahanka Deganaha Guryaha Dadweynaha (Public Housing Resident Survey). Ujeedadu waa in laguugu sharxo adiga si waadax ah wixii ku saabsan sahanka sidaas darteed waxaad bixin kartaa go'aan warqab ah oo ku saabsan haddii aad ka qaybgeli doonto.

Keliya markaad ogolaato inaad ka qaybqaadato, waxaanu awoodi doonaa in aan bilawno sahanka.

Macluumaadkayga ma la xafidayaa?

Barayfasiga macluumaadku waa mudnaan u saraysa xiriir kasta oo aad bixisana waa la tirtirayaa dhamaadka sahanka.

Qiimaynta saamaynta barayfasiga ayaa waxaa dhamaystiray wasaarada sida looga baahan yahay Xeerka Barayfasiga (Privacy Act).

Kama qayb qaadanayo saamaynta sahanka ama kiraysiga?

Maya. Kama qaybqaadanayo sahankaan mana yeelanayo saamayn la xiriirta kiraysigaaga. Sahanku gebi ahaanba adiga ayuu kugu xiran yahay wasaaraduna ma ogaanayso haddii aad ogolaatay inaad samayso sahanka ama aadan samayn.

Haddaad doorato inaad ka qaybqaadato sahanka sina uma saamaynayso kiraysigaaga hadda ah iyo kan kiraysiga mustaqbilka aad la samayn karto wasaarada.

Maxay lug ku yeelanaysaa haddii aan doorto in aan sameeyo sahanka?

Haddii aad ogolaato inaad ka qaybgasho sahankaan, waxaa jira dhowr nooc oo lug loogu yeesho. Waxaad ku qaban kartaa sahanka:

1) Telefoonka
2) Online-ka

La xiriir McNair yellowSquares qiimaha meeshaad joogto nambarkuna waa 1800 669 133 ama u dir email solutions@mcnair.com.au oo codso inaad buuxiso sahanka.

Sahanku ma qaadanayo wax ka badan 15 daqiiqo si loo buuxiyo. Haddii aad doonayso inaad ku buuxiso sahanka luqad aan ka ahayn Ingiriis, waxaad codsan kartaa mutarjum haddii aad hesho telefoon wac form McNair yellowSquares.

Ka qaybgelida sahankaani khasab maaha.

Haddii aad go'aansato inaad ka qaybqaadato ka dibna aad isbedesho, xor ayaad u tahay inaad kaga baxdo sahanka heerkaad rabto. Macluumaad kasta oo lagaa hellay maalintaas waa la baabinayaa. Go'aankaaga inaad ka qaybqaadato ama aadan ka qaybqaadan, ama ka qaybqaadato ka dibna iskaga baxdo saamayn ku yeellan mayso kiraysiga siday tahayba.

Yaan u dacwoonayaa haddii aanan ku faraxsanayn sahanka ama in waraysi lala yeesho?

Wax dareen ah ma ka qabtaa wixii ku saabsan (Public Housing Resident Survey) Sahanka Deganaha Gurisiinta Dadweynaha) fadlan la xiriir laanta Dib-qaabaynta Gurisiinta Bulshada oo ah shr@dhhs.vic.gov.au.

Lacag ma laygu siinayaa sahanka?

Waxaa lagu siin doonaa $10 oo ah foojarka Subarmaakita waqtigaad gelisay buuxinta oo ah 15 daqiiqo sahan ah.

Foojarka waxaa kuu soo diri doonta McNair yellowSquare markaad buuxiso sahanka. Iyada oo la xiriirta siyaasada Wasaarada, foojarka looma isticmaali karo in lagu gato aalkolo ama sigaar.

Goorma la sii daynayaa natiijooyinka sahanka?

Wasaaradu waxay ku bixin doontaa natiijada sahanka oo kooban horaanta 2021 websaytka wasaarada (www.dhhs.vic.gov.au).

(Victorian Public Tenants Association) Ururka Kiraystyaasha Dadweynaha ayaa iyaguna kuu sheegi kara sii daynta sahanka telefoonka 1800 015 510 ama www.vpta.org.au.